# ISNADAAMIS

## Waa maxay ujeeddooyinka buugyarahan?

Buugyarahan waxaa loo qoray si uu kaaga caawiyo in aad wax dheeraad ah ka fahanto cudurka isnadaamiska (scabies). Waxaa laguugu sheegi doonaa waxa uu yahay, waxa keena, waxa laga qaban karo, iyo halka aad ka heli karto war dheeraad ah oo ku saabsan.

## Waa maxay cudurka isnadaamisku?

Cudurka isnadaamisku waa xaalad cudur oo haragga caadi ugu dhacda oo cuncun badan oo ka timaadda cayayaanka isnadaamiska ee insaanka. Waxuu saamayn karaa dadka da' kaste ah laakiin waxuu ku sii badan yahay dhallinyarada iyo dadka waayeelka ah.

## Maxaa keena cudurka isnadaamiska?

Cayayaanka keena cudurka isnadaamisku waa dulin aad u yar yar, oo ka yar afka biinka. Waxaa caadi ahaan lagu soo qaadaa taabashada toos ah ee haragga qof kaloo hore u leh cudurka isnadaamiska, marar aad u dhif ah ayaana laga soo qaadaa shayada ay ka mid yihiin dharka ama marooyinku. Xayawaanka gurigu ma fidiyaan. Dadka leh cudurka isnadaamiska waxaa haraggooda ku jira isku celcelis qiyaas ahaan laba iyo toban cayayaan oo qaangaar ah; xoogaa ka mid ah kuwo aad uga badan ayaa saaran. Wasakh ahaantu ma keento cudurka isnadaamiska. Marar dhif ah, nooca isnadaamiska ee la yiraahdo isnadaamiska qolof leh ayaa ku dhici kara bukaanleyda uu ka yar yahay nidaamka difaaca ee jirku ama waayeel ah oo buka. Waxaa haragga ku jira kumanaan cayayaanka cudurka isnadaamiska ee noocaas ah aad ayaana la isugu tebiyaa.

## Cudurka isnadaamiska miyaa la iska dhaxlaa?

Maya, laakiin waxaa caadi ah in dhowr qof oo qoys ka mid ah ay yeeshaan isla waqti keliya.

**Waa maxay calaamadaha cudurka isnadaamis?**

Cuncunka ayaa ah calaamadda ugu badan ee cudurka isnadaamis, caadi ahaan waxuu bilaabmaa qiyaas ahaan hal bil ka dib marka la soo qaado cayayaanka. Cuncunku waxuu saameeyaa jirka iyo addimada laakiin ma gaaro madaxa iyo qoorta, wixii aan ahayn sabiga. Cuncunku waxuu badi ka sii daraa marka sariirta la jiifo habeenkii. Waxaa caadi ah in dhowr qof oo qoys keliya ka mid ah, iyo saaxiibbadood, ay cuncun yeeshaa isla waqti keliya.

**Maxuu cudurka isnadaamisku u eeg yahay?**

Firiirica isnadaamisku waxuu ka kooban yahay oo isugu jira calaamadaha xoqidda iyo meelo qolof leh oo cas; ka dib waxuu yeeshaa bukaansho jeermis waxaana ka soo baxa dhulluxyo yar yar oo malax leh. Waxaa aad caadi u ah firiiric jirkoo dhan gaara oo u eeg cambaarta (dermatitis). Firiiricaas cuncunka leh waxuu gaaraa haragga qayb ballaaran oo ka mid ah laakiin cayayaanka waxaa ugu badnaan laga helaa meelaha faruhu ay iskaga xiran yihiin iyo baabacooyinka gacmaha, curcurta, kuraankurta iyo cagta cad. Cayayaanka isnadaamisku waxay haragga ka qodaan meelahaas si ay ukuntooda u dhigaan. Godadku waxay ku soo baxaan xarriiqado yar yar oo midabka dambaska leh oo haragga ka muuqda. Cayayaanka qaangaarka ah aad ayay u yar yar yihiin, waxuu dhererkoodu yahay qiyaas ahaan 0.4 mm, iyagoo bikaacada dhexdeeda u muuqda dhibic yar oo madow oo taalla dhammaadka godka. Wixii khuseeya cudurka isnadaamiska ee qolof leh waxuu firiiricu u eekaan karaa cudurka psoriasis ee ah cudurka haragga ee meelo jirka ka mid ah oo qolof yeesha waxaana suurogal ah in aanan laga dareemin cuncun badan.

**Sidee loo soo ogaadaa cudurka isnadaamiska?**

Takhtarkaaga ayaa caadi ahaan cudurka isnadaamiska ku soo ogaan kara sheekadaada iyo baarista firiirica. Waxyaabo laga soo xoqo godka ayaa lagu eegi karaa miikariskoobka si looga eego cayayaanka iyo ukuntooda.

**Miyaa la wada daawayn karaa cudurka isnadaamiska?**

Haddii la iska daawayn waayo, cudurka isnadaamisku waxuu socdaa bilo ama xataa sanado; laakiin marka la helo daawaynta habboon, si dhakhso ah ayuu gebi ahaan u baaba'aa. Xataa marka daawayn lagu dilo cayayaanka cuncunku waxuu caadi ahaan sii socdaa xoogaa toddobaadyo ah.

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fakis: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Lam. Diiwaangelinta Hay'adda samafal ah 258474

**Sidee habboon in loo daaweeyo cudurka isnadaamiska?**

Daawaynta cudurka isnadaamiska waxaa ka mid ah:

1. Iska saaridda cudurkaaga isnadaamiska.
2. Hubinta in adiga iyo dadka kale ee aad xiriiri la leedahay aydaan dib u qaadin. Waxay taasi ka dhigan tahay waa in isla waqti keliya la wada daaweeyo dhammaan xubnaha qoyska iyo xiriirrada galmeed haddii ay cuncun leeyihiin iyo haddii kale.

Dhowr daawooyin ayaa waxtar u leh daawaynta cudurka isnadaamiska. Waxaa kuwaas ka mid ah, oo sida ugu badan looga isticmaalaa Ingiriiska permethrin iyo malathion. Waxaa fiican in la fiiriyo in daawada lagu siiyey ay tahay mid gaar ahaan loogu talagalay in loo isticmaalo cudurka isnadaamiska, maxaa yeelay labada daawo waxay ku jiraan badeecooyin farabadan, oo qaarkood ay waxtar u leeyihiin uun injirta madaxa. Takhtarkaaga ayaa daawooyin kale kula talin kara haweenka uurka leh ama ilme naasnuujiya, ama dhallaanka.

Si faahfaahsan u raac tilmaamaha la socda daawayntaada; waxay ku salaysan yihiin fikradaha soo socda:

- Waxaa dhici karta in cayayaanku ay meel kaste haragga kaga jiraan, markaa waa in daawada la mariyo dhammaan meelaha ka hooseeya qoorta dadka waaweyn (iyo weliba madaxa carruurta), oo ma aha in lagu koobo uun qaybaha cuncunka leh.
- Waa in daawada jirka lagu daayo ugu yaraan muddo 12 saacadood ah ka hor inta aanan la iska mayrin.
- Marka aad gacmahaaga mayrto, daawada ka dib mar kale mari gacmahaaga.
- Laba jeer oo daawada la marsado, oo loo dhexeysiiyo hal toddobaad, ayaa loo baahan yahay si loo dilo cayayaanka ka soo baxay ukunta ka dib markii ugu horraysay ee daawada la marsaday.
- Waxaa cayayaanka lagu saari doonaa mar keliya oo caadi loo mayro marooyinka iyo dharka.
- Looma baahna in la qubaysto daawaynta ka hor.

Haddii cudurka isnadaamisku uu u adkaysto daawaynta ama haddii uu yahay nooca qolof leh, waxaa markaa laguu qori karaa daawo afka laga qaato oo la yiraahdo ivermectin, iyadoo caadi ahaan ka kooban kiniinno laba jeer la qaato oo hal toddobaad u dhexeeyo.

Ugu dambayn, haddii aad cudurka isnadaamiska ka qaadday lammaane galmeed, waxaa suurogal ah in uu takhtarkaagu rabo in uu kaa baaro cudurro kale oo suurogal ah in aad isla waqtigaas qofkaas ka qaadday.

**Maxaa anigu samayn karaa?**

Haddii aad raacdo tilmaamaha lagu siiyo, si guul leh ayaad isaga baabi'in doontaa cudurkaaga isnadaamiska. Waa in aad weliba hubiso in dadka aad isku dhowdihiin ay dhammaantood marsadaan daawada isla waqtiga aad adigu is mariso. Waxaa caadi ah, oo nasiibxumo ah, in mar kale la qaado cudurka isnadaamiska.

**Halkeen ka heli karaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan cudurka isnadaamiska?**

*Internetka*:
http://www.aad.org/dermatology-a-to-z/diseases-and-treatments/q---t/scabies
www.medinfo.co.uk/conditions/scabies.html

**Waxay ujeeddada buugyarahan tahay in aad ka hesho warbixin sax ah oo ku saabsan mawduuca waxaana la isugu keenay fikradaha ay qabaan wakiillada Ururka Xirfadleyaasha haragga ee Ingiriiska: hase yeeshee, waxa ku jira ayaa laga yaabaa in uu mararka qaar ka duwan yahay talobixinta aad ka hesho takhtarkaaga.**

*Buugyarahan waxaa kartida akhriska u qiimeeyey Golaha Dib u eegidda Aan xirfad lahayn ee Warbixinta Bukaanleyda ee Ururka Xirfadleyaasha haragga ee Ingiriiska*

**URURKA XIRFADLEYAASHA HARAGGA EE INGIRIISKA**
**BUUGYARAHA WARBIXINTA BUKAANLEYDA**
**LA SOO SAARAY AUGUST 2004**
**LA CUSBOONAYSIIYEY MAY 2010, SETEMBAR 2013**
**TAARIIKHDA DIB U EEGIDDA SETEMBAR 2016**

Health & care information you can trust
The Information Standard Certified Member